



THE STATE EDUCATION DEPARTMENT / THE UNIVERSITY OF THE STATE OF NEW YORK /
ALBANY, NY 12234

Jhone M. Ebert, Senior Deputy Commissioner for Education Policy
Education Building, Room 2M EB (518) 474-3862
89 Washington Avenue
Albany, NY 12234
jhone.ebert@nysed.gov

Feebaraayo 27, 2017

Kusocota: Kormeerayaasha Guud ee Degmada
Kormeerayaasha Dugsiga Dowladda
Maamulayaasha Dugsiga Dowladda
Maamulayaasha Iskuulada aan Dawliga ahayn iyo kuwa Gaarka ah

Kasocota: Gudoomiye kuxigeenka Sare Jhone M. Ebert

Mawduuca: Tilmaamaha iyo adeegyada laheli karo si looga hortago dhibaataaynta, xoog usheegashada iyo midab kala sooca ee dugsiyada kajira ayadoo lafiirinaayo talaabooyinka soogalootiga laxiriira ee dhawaanahaan lasameeyay

Todobaadyadii dhawaa, warbixnada laxiriira dhacdooyinka xoog usheegashada, midab kalasooca, iyo dhibaataaynta dugsiyada kadhex dhaca wadankoo dhan waxay aad ugasoo muuqdeen saxaafada. Waxaa intaa siidheer, tallaabooyinka ugu danbeeyay ee la xiriira soogalootiga ee ay qaadeen saraakiisha federalka waxay abuurta cabsi iyo wareer wadankoo dhan ah. Waaxda Waxbarashada ee Gobalka New York ("NYSED" ama "Waaxda") waxay si adag ufiirinaysaa falkasta oo waxyeelaynkara habkooda dugsiga ee ardaydu wax ku bartaan maalinkasta. Gobalka New York dhexdiisa, qareenada, waalidiinta, iyo shaqaalaha dugsiga waxay kadalbadeen waaxda inay balaariso waxna kudhisto tilmaamaha jira iyo adeegyada si looga hortago dhibaataaynta, xoog usheegashada, iyo midab takoorka, sidoo kalena ay kor uqaadaan dadaalada si loo dhiso loona ilaaliyo jawiga dugsiga ayadoo waafaqsan Sharciga Xasaanada Dhamaan Ardayda ("DASA" ama "Sharciga Xasaanada").

Sharciga Xasaanada ee Gobalka New York waxaa lasaxiixay 2012 si ardadu uhelaan bii'o amaan ah oo taageero leh oo kacaagan midab takoor, dhibaataayn, iyo xoog usheegasho dugsiga dhexdiisa ah, baska dugsiga ama qaybaha dugsiga, waxaana ladhaqangaliyay 2013 in lagusoo daro xoog usheegashada dhanka internetka laysku mariyo.¹ Sharcigu wuxuu kadoonayaa dugsiyada inay siiyaan ardayda, dadka booska waalidka jooga, iyo shaqaalaha macluumaadka quseeya DASA ayna la imaadaan siyaasado iyo qorshayaal kuwaasoo ubaahan bii'o iskuul oo amaan ah. Gaar ahaana, DASA waxay kadoonaysaa deegaanada dugsiga inay sameeyaan aqoonsiyo xiriirin ah kuwaasoo mamnuucaaya dhibaataaynta, xoog usheegashada (ayna kujirto xoog usheegashada internetka laysku mariyo), iyo midab takoorka ardayda ay

¹ S iaad u hesho tilmaamo iyo adeegyo dheeri ah oo la xiriira Sharciga Xasaanada fadlan booqo, <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/>.

ugaystaan ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga, si lamida taas waa in ay bixiyaan jawaabo ku aadan dhacdooyinka midab takoorka iyo dhibaataaynta iyo in lagu wargaliyo dhacdooyinka noocaan ah NYSED.

Sida hoos lagu qeexayba, NYSED oo gacan kahelaysa Xafiiska Gobalka New York ee Xeer Ilaaliyaha Guud (“OAG”), wuxuu soo saaray tilmaan iyo adeegyo si gacan loo siiyo shaqaalaha dugsiga, macalimiinta, iyo waalidiinta warbixintooda waxna laga qabto dhacdooyinka dhibaataaynta, xoog usheegashada, iyo midab takoorka. Dukumiinti tilmaameed midaysan oo ay soosaareen NYSED iyo OAG bisha August 2016 waxaa kamid ah fook kasbo ah oo kahadlaaya wargalinta iyo baarista DASA ee dhacdooyinka.² Waaxdu waxay rajaynaysaa in shaqadaan muhiimka ah lawayneeyo ayadoo dugsiyada laxasuusinaayo iyo qoysaska in tilmaamida iyo caawinada farsamo ee quseeya DASA iyo in iskuulo amaan ah oo taageero leh ay leedahay waaxdu.

NYSED waxaa kudhiira galinaysaa degmooyinka, waalidiinta, iyo dadka caruurta masuulka ka ah kuwaasoo suaalo kaqaba DASA inay lasoo xariiraan NYSED si tilmaan loosiiyo iyo taakulo farsamo oo laxiriira maamusyada baaritaano quman iyo qaababka iyo talaabooyinka abuurida iyo ilaalinta bii’o iskuul amaan ah oo taageero leh. Waaxda waxaa lagasoo xariiri karaa.

- Xafiiska Waxbarashada Labada luuqadood ah iyo Luuqadaha Caalamiga ah (OBEWL) adoo kala xariiraaya (718) 722-2445 ama obewl@nysed.gov, Ama
- Xafiiska Adeegyada Taageerida Ardayga (SSS) adoo kala xariiraaya (518) 486-6090 ama studentsupportservices@nysed.gov.

SI dheeraad ah, dadka suaalaha kaqaba DASA kuwaasoo ubaahan caawimaad dhanka luuqada waxay laxariiri karaan Shabakada Kobalka ee Waxbarashada Labada luuqadood ah (RBERN) Teleefanka waalidka ah, ee kuyaala Jaamacada New York (“NYU”) ayadoo:

- Labuuxinaayo foomka suaalaha ee halkaan
- Phone: (800) 469-8224
- Fax: (212) 995-4199
- Email: nysparenthotline@nyu.edu
- Mail: NYS ELL Parent Hotline Team
c/o NYS Statewide Language RBERN at NYU MetroCenter
726 Broadway – 5th Floor
New York, NY 10003

Shaqsiyaadku waxay sidoo kale racfaan kaqaadan karaan talaabada degmada taasoo waafaqsan Sharciga Waxbarashada §310. Sharciga Waxbarashada §310 waxay siisaa qolyahaas isku arka inuu ka eexday go’aan lagu qaatay kulanka degmada dugsiga ama maamulada dugsiga waxay racfaan udiri karaan Gudoomiyaha

² Tilmaantaan waxaa laga helikaraa <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/documents/SED-AGLtrandGuidance8-31-16.pdf>.

Waxbarashada si loo fiiriyo talaabada noocaan ah. Macluumaadka buuxinta racfaanada waxay kuqoranyihiin, English, Spanish, Carabi, Chinese (Lafududeeyay), Bengali, iyo Haitian Creole adoo kahelaaya: www.counsel.nysed.gov.

Fadlan ogoow waaxdu waxay utaagantahay ilaalinta sirnimada macluumaadka heerka shaqsi ee ardayga waxay u ilaalisaa macluumaadka noocaan ah sida ay qabaan shuruuqda arimaha shaqsiyaadka ugaarka ah iyo xeerarka, ayna kamid yihiin Sharciga Xuquuqda Waxbarasho Federaliga ah ee Qoyska iyo arimaha qaaska u ah shaqsiyaadka.

Waaxdu waxay soo saaraysaa adeegyo lasiiyo waaliska, dadka masuulka ka ah, iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaaya wixii quseeya DASA oo loo turjumay tobanka luuqadood ee ugu saraysa ee looga hadlo Dhamaan Gobalka New York.

Intaa waxaa siidheer, NYSED waxay aqoonsatay adeegyada soo socda iyo qalabka kuwaasoo gacan siin kara shaqaalaha dugsiga, ardayda, waalidiinta, iyo bulshooyinka. Fadlan isticmaal adeegyadaan meesha kuhaboon, kunosoo biir dadaaladayada si loo xaqiijiyo badqabka iyo caafimaadka dhamaan arday adoo u adeegsanaaya qalabkaan bulshooyinka iskuulkaaga yoolalkiisa iyo baahiyihiisa.

- NYSED iyo NYS Waraaqda Xeer Ilaaliyaha Guud uqoray Kormeerayaasha Degmada iyo Tilmaanta: <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/documents/SED-AGLtrandGuidance8-31-16.pdf>
- Waxkaqabashada Xoog usheegashada, Dhibaataaynta, Hanjabaada, iyo midab kala sooca kajira Iskuuladeena: http://www.p12.nysed.gov/dignityact/documents/PreventBullyingInYourSchool_Nov2016.pdf
- Qalabka tabarada quruxda si gacan looga siiyo degaanada dugsiga tababarida shaqaalaha dugsiga: https://ag.ny.gov/sites/default/files/dasa_training_materials_final_-_8.30.16.pdf
- Sharciga Xasaanada Dhamaan Ardayda, sinaanta "adeega iyo balanqaadka hawlaha waxay utilmaamaan Maamulayaasha dugsiga & Kuliyada" tilmaamo dheeri ah iyo qalab si loo abuurto iskuulo amaan ah oo taageero leh: <http://www.p12.nysed.gov/dignityact>
- Xarunta Gobalka New York ee Badqabka Iskuulka iskuxirkeeda boobsiis ah ee adeegyada barida dulqaadka, iyo ilaalinta amaanka deegaan waxbarasho oo caafimaad leh: <http://www.nyscfss.org/#!/quick-links/c13iz>
- NYSED macluumaadkeeda la xiriiira Qorshaynta Jawaab kabixinta Degdega ah ee Iskuulka iyo Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Iskuulada: <http://www.p12.nysed.gov/sss/ssae/schoolsafety/save/>
- Xarunta Gobalka New York ee Caafimaadka Iskuulka ee Caafimaadka Dhimirka oo la cusboonaysiiyay iyo Bogga Adeegyada Latalinta: <https://www.schoolhealthny.com/site/default.aspx?PageType=3&ModuleInstanceID=190&ViewID=7b97f7ed-8e5e-4120-848f-a8b4987d588f&RenderLoc=0&FlexDataID=108&PageID=126>

Markale, waad kumahadsan tahay dadaalkaaga maalinkasta ah eed kutaageeraysid ardaydayada, qoysaskayaga, iyo bulshooyinka Gobalka New York oo dhan. Markaan isla jirsano, waxaan xaqiijin karnaa in ardaydayada iyo bulshooyina iskuulkayaga ay dareemaan kuwo lagac lasiinaayo dugsiga dhexdiisa. Sida markasta, fadlan nalsoo xariir hadaad ubaahato inaad mawduuc muhiim ah nala wadaagto ama aad qabto walaacyo adoo kala xariiraaya Xafiiska Adeegyada Taageerida Ardayda 518-486-6090, or studentsupportservices@nysed.gov ama Xafiiska Waxbarashada Labada luuqadood ah iyo Luuqadaha Aduuka 718-722-2445, ama obewl@nysed.gov.